



Farriintani waxaa la soo geliyay iyada oo ah Ingiriisi waxaan si dhakhso ah loo soo gelin doonta iyada oo ah Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 14, 2021-ka

Ku socota: Bixiyayaasha Daryeelka Guriga Dadka Waayeelka ah ee I/DD  
Ka socda: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Taageerada shaqaale yaraanta ee loogu talagalay daryeelka guriga dadka waayeelka ah ee I/DD

Iyada oo qayb ka ah dadaalada guud ee lagu xaqiijinayo in dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ay si ammaan ah ugu sugnaan karaan guryahooda hadda inta arrimaha dhanka shaqaaluhu ay weli yihiin caqabad, Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon (ODHS) ayaa bilawday qandaraas ay la leedahay shirkad shaqaaleysiisa shaqaalaha daryeelka caafimaadka si loo keeno shaqaale taageera daryeelka guriga dadka waayeelka ah ee loogu talagalay dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD).

ODDS waxay adeegsanaysaa xogta ra'yi ururinta oo ay bixiyeen bixiyayaasha daryeelka guriga dadka waayeelka ah ee I/DD (Waad ku mahadsan tihiin kuwa buuxiyay ra'yi ururinta!) si loo ogaado guryaha u baahan waxaana mudnaanta la siinayaa iyadoo lagu saleynayo waqtiga jawaabta ra'yi ururinta, darnaanshaha baahida iyo tirada shaqaalaha ee uu heli karo qandaraaslaha degaankaasi.

ODDS ayaa wici doonta hay'adaha daryeelka bixiya ee u baahan shaqaale si ay u ururiyaan macluumaad dheeraad ah. Marka shaqaale la heli karo oo loo qoondeeyo guri, ODDS waxay bilaabi doontaa qandaraas ay la leedahay daryeel bixiyaha wax helaya. Qandaraasyadani:

- Marka hore waa 30 maalmood, iyaga oo leh kala doorashada ah in la kodhiyo oo la gaarsiiyo 30 maalmood oo dheeraad ah marka la codsado.
- Wuxuu waqtigoodu dhici doonaa oo ku egyihiin Diisambar 31, 2021.
- Waxay bixiyayaasha daryeelka guriga dadka waayeelka ah ee I/DD uga baahan yihiin in ay tababaraan shaqaalaha qandaraaska la siiyay si ay uga shaqeeyaan guryahooda.
- Waxay daryeel bixiyayaasha uga baahan yihiin in ay raacaan [Tilmaamaha Dib u furitaanka](#) ee ODDS ee hadda jira.

Ka hor inta aan la helin taageero, daryeel bixiyayaashu waa in ay saxiixaan warqad heshiis. Tusaalaha warqada waxaa laga haleyaa [internet-ka](#).

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).